



OGAYSIIIS MUHIIM AH OO KU SAABSAN CAABUQA KORONAFAYRAS(COVID-19) OO LOOGU TALO GALAY DHAMMAAN QAXOOTIGA IYO MAGANGALYO-DOONKA KU NOOL NAWAAXIGA MAGAALOOYINKA (Lasoo saaray: 27-ka Abriil 2020)

15-ka Maarso 2020, Dowladda Kenya waxay ku dhawaaqday tallaabooyin gaar ah oo looga hortagayyo faafida Caabuqa Koronafayras(COVID-19). Laga bilaabo, 27-ka Maarso 2020-ka, waxaa **dalka oo dhan** ka jira bandow joogta ah oo loogu talo galay **dhammaan dadka ku sugan Kenya** inta u dhaxaysa 7-da fiidnimo illaa 5-ta aroornimo **kaasoo socon doona isla marxaladaan illaa 16-ka Maajo(Suurto-gal ah in la sii kordhiyo iyado xaalada ku xiran tahay)** Lama ogola inaad ka baxdaan guryihiinna inta lagu jiro wakhtigaan, haddii kale waa la idin xirayaa. Taa bedelkeeda, waxaa xaruun khaas ah kugu karantiili kara dowladda Kenya muddo 14 maalmood ah adigo iska bixinayya qarashka.

Intaa waxaa sii dheer, in 6-da Abriil 2020, Dowladda Kenya ay ku dhawaaqday inaysan jiri doonin soo galis iyo ka bixitaan Nawaaxiga Magaalada Nayroobi laga billaabo 6-da Abriil 2020 iyo sidoo kale degmooyinka Kilifi, Kwale iyo Mombasa laga billaabo 8-da Abriil 2020; **xayiraadahaani way sii socon doonaan illaa 16-ka Maajo, 2020. Intaasi waxaa dheer, in xayiraado noocaan oo kale ah looga dhawaaqay degmada Mandera 22-ka Abriil 2020.** Ha sameynin isku day kasta oo ah inaad soo gasho ama ka baxdo agagaarkaan haddii kale waa lagu xiri doonaa. Waad ku socsocon kartaa gudaha deegaanka aad ku nooshahay.

Waa inaad xirataa maskaraha wejiga marka aad ku sugan tahay goobaha caamka ah-laakiin ha ilaawin inaad si joogta ah gacmahaaga ugu mayrato saabuun iyo biyo. Tani waxaa loogu talo-galay badbaadada waana dantaada. Intaasi waxaa sii dheer, waxaa sidoo kale gacan ka gaysan doontaa yareynta faafitaanka cudurka Koronafayres (Covid-19) *Balse waxaa muhiim ah inaad ogaato:* Haddii aadan xiran maskaraha wajiga, waxaa lagugu ganaaxayaa lacag dhan 20,000 Kenya Shilin amaba 6 bilood oo xarig ah ama labadaba.

Lacalla haddii dowlada ay ka samayso **baaritaan caafimaad baaxad leh** goobo kala duduwan si loo xakameeyo faafitaanka cudurka Covid-19, oo adigana joogtid goobahaas, fadlan **wada shaqayn la yeelo shaqaalaha wasaarada caafimaadka.**

Fadlan haku warwareegin meelaha si micno darro ah dharaartii. Haddii ay daruuri tahay inaad socoto, waa in marwalba **sidataa warqadahaaga aqoonsiga.** Intaas ka sokow, **la soco** tilmaamaha ay soo saartay Dowlada Kenya oo xaqiiji inaad u hoggaansanaato.

Lambarrada Gargaarka Degdegga ah

- **Diiwaangelinta / xaaladaha degdegga ee warqad-siinta:**
Xoghaynta Arrimaha Qaxootiga Shauri Moyo: 0772057770
- **Khadka Caawinta ee UNHCR:** 0800720063 (bilaash ah)
- **Xaaladaha degdegga ee Caafimaad:**
NCCK 0704873342 / 0723281352/ 0723281362
- **Xaaladaha degdegga ee la xiriirta sharciga (sida xiriitaan, dhibaataayn boolis):**
Kituo cha Sheria 0721991736
- **Xaaladaha degdegga ee maciishada:**
Danish Refugee Council 0800720181
- **Arrimaha la xiriira Caymiska NHIF (Sanduuqa Caymiska ee Isbitaalaadka Qaranka):** 0740049502
- **Khadka Tooska ah ee la talinta**
1190/ 1199/ 0721 336017
- **Khadka Tooska ah ee Rabshadaha la Xiriira Jinsiga**
1195/ 0800720501
- **Khadka Tooska ah ee Ilaalinta Caruurta**
116

Caabuqa COVID 19 wuxuu si toos ah ku faafaa dhibcaha (qufaca/hindhisada) ka imaanaysa qof qaba cudurka; si aan toos ahayn wuxuu ku fidaa iyada oo la taabto sagxadaha ama walxaha uu isticmaalay qof cudurka qaba. Haddii aad leedahay **mid ka mid ah calaamadaha Caabuqa** Koronafayras (COVID-19) sida qandho, qufac, neef-tuur iyo neefsashada oo kugu adkaata, fadlan kala xiriir **Wasaaradda Caafimaadka** halkaan 0800721316 (bilaasha ah); 0732353535; ama 0748592558 si lagu hago.